

**Baahida Waxbarashada
Gaarka ah**

**(Special Education Needs)
(SEN)**

Tilmaan-bixiye loogu talagalay waalidka
iyo daryeelayaasha

department for
education and skills
(qaybta waxbarashada iyo farsamada)

Tusmada

		Goorma ayay LEA sameyn doontaa cadeynta ugu dambeysa?	24
Hordhac	2	Ka waran haddii LEA ay go'aan ku gaadho in ilmahaagu aanuu u baahnayn cadeyn?	26
Xeerarka Aasaasiga ah	3	Ka waran haddii aanad raalli ka ahayn go'aanka LEA?	26
Baahida waxbarashada gaarka ah (special education needs) – waa maxay macnaheedu?		Dib-u-fiirinta cadeynta ee sannadlaha ah	27
Maxaa aad sameyn kartaa haddii aad ka walwalsan tahay in ilmahaaga ay dhibaatooyin haystaan?	6	Isbeddel ma lagu sameyn karaa cadeynta?	28
Haqabtirka baahida waxbarashada gaarka ah	7	Ka waran haddii aanad raalli ka ahayn isbeddelada LEA?	30
Waa maxay habka jaranjarada ahi?		Qorsheynta gala-guurka	30
Ka waran haddii aanad raalli ka ahayn goobaha waxbarashada hore (early education settings) ama dugsiga?	11	Ikhtiyaarka ka dib 16 jir	31
Qiimeynta (assessment) iyo cadeynta (statement)		Mudo intee leeg ayaa cadeyntu jirtaa?	32
Waa maxay qiimeyn faahfaahsani (statutory assessment)?	13	Ma weydiisan kartaa in ilmahaaga mar kale la qiimeeyo?	33
Mudo intee leeg ayaad sugi doontaa in LEA go'aan ka gaadho in ilmahaaga loo sameeyo qiimeyn iyo in kale?	14	Maxaa dhaca haddii aad u guurtid LEA ku taalla aag kale?	33
Maxaad sameyn kartaa haddii LEA ay go'aan ku gaadho inaanay qiimeyn u sameynaynin ilmahaaga?	15	Maxaa dhaca haddii aad is khilaafsan tihiin LEA?	34
Qiimeynta	16	Waa maxay adeeg iskaashi waalid?	35
Qiyaasta Wakhtiga qiimeynta	18	Waa maxay adeeg xalin khilaaf?	36
Maxaa dhaca ka dib qiimeynta?	19	Waa maxay Maxkamada Baahi Waxbarasho Gaar ah?	36
Waa maxay cadeyn?	20	Mudo intee leeg ayaa la raba inaad racfaan ama ambiil ku qaadatid?	37
Ka waran haddii aanad raalli ka ahayn go'aanka LEA?	20	Ka waran haddii Maxkamadu aanay qaadi karin dacwadaada?	38
Maxaa dhici doonaa marka cadeyn loo diyaariyo ilmahaaga?	21	Qeexidda	38
Ma dooran kartaa dugsiga ilmahaaga?	22	Qoraalada kale ee waxtar kuu yeellan kara	41
		Haddii aad u baahan tahay gargaar dheeraad ah	41
		Adreesyada faa'iidada leh	42
		Adeegyada iskaashiga waalidka – teleefonada lala xidhiidho	51
Mudo intee leeg ayaad haysataa oo aad faallo ku sameysid?	24		

Marka goobaha waxbarashada hore (early education settings), dugsiyada, LEA (Maamulka Waxbarashada Degmada) iyo adeegyada caafimaadka iyo bulshadu go'aan ka gaadhayaan sidii ay u caawin lahaayeen ilmaha leh baahi waxbarasho oo gaar ah (special education needs), waa inay mar kasta ka fiirsadaan waxa uu qorayo Xeerka Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN).

Xeerka ugu muhiimsan ee khuseeya waxbarashada gaarka ahi waa Xeerka Waxbarashada ee 1996 (1996 Education Act). Xeer Dhaqan oo Loogu Talagalay Baahida Waxbarashada Gaarka ah (Special Education Needs Code of Practice) ayaa bixiyaa tilmaan ku saabsan sida loo ogaado loona qiimeeyo ilmaha leh baahi waxbarasho oo gaar ah. Dhamaan goobaha waxbarashada hore (early education settings), dugsiyada dawladda iyo LEA waa inay xisaabta ku daraan Xeerka marka ay la dhaqmayaan caruur leh baaahi waxbarasho gaar ah. Waxa kale oo adeegyada caafimaadka iyo bulshada laga raba inay xisaabta ku daraan Xeerka marka ay caawinayaan LEA. Taa macnaheedu waxa weeye marka ay goobaha waxbarashada hore, dugsiyada, LEA iyo adeegyada caafimaadka iyo bulshadu go'aan ka gaadhayaan sidii ay u caawin lahaayeen ilmaha leh baahi waxbarasho oo gaar ah (special education needs), waa inay mar kasta ka fiirsadaan waxa uu qorayo Xeerku.

Hordhac

Ulajeedada tilmaan-bixiyahani waxa weeye inuu kaa caawiyo fahmidda:

- waxa ay tahay baahida waxbarashada gaarka ahi
- waxa aad sameyn kartid haddii aad ka walwalsan tahay in ilmahaaga dhibaatooyin haystaan ka hor ama wakhtiga uu dugsigu tagayo
- sida aad u caawin kartid ilmahaaga
- waxa goobaha waxbarashada hore iyo dugsiyadu sameyn karaan si ilmahaaga loo caawiyo
- waxa maamulada waxbarashada degmada iyo adeegyada kale sameyn karaan si loo caawiyo ilmahaaga xuquuqdaada iyo xuquuqda ilmahaaga.

Xeerarka aasaasiga ah

Qodobada aasaasiga ah ee aad u baahan tahay inaad maskaxda ku haysid marka aad akhrinaysid tilmaan-bixintan waa:

- dhamaan caruurta leh baahi waxbarasho oo gaar ah waa in la haqabtiraa baahidooda
- caadi ahaan baahida waxbarashada gaarka ah waxa lagu haqabtiraa goobaha waxbarashada hore ee caadiga ah (eeg qeexidda) ama dugsiyada
- waa in ra'yigaaga xisaabta lagu daraa waana in rabitaanka ilmahaaga la dhageysto
- waxa aad door muhiim ah ku leedahay taageerista waxbarashada ilmahaaga
- waa in ilmaha leh baahi waxbarasho gaar ah la siiyo waxbarasho balaadhan, oo si fiican u miisaaman oo waxtar leh, oo ay ku jirto manhajka heerka aasaaska (foundation stage curriculum) (oo loogu talagalay da'da min 3 ilaa 5) ama Manhajka Qaranka (National Curriculum) (oo loogu talagalay da'da min 5 ilaa 16).

Waa in lagaala tashado wixii ku saabsan dhamaan go'aamada saameynaya ilmahaaga.

Hadduu aad qabtid su'aalo ama walwal mar uun, waa inaad la wadaagtid macallinka ilmahaaga ama macallinka madaxa ah ama xirfadle kasta oo la shaqeeya ilmahaaga.

Waa inaad mar kasta weydiisatid talo adiga oo aan sugin.

Haddii aad doonaysid inaad la hadashid qof madax-banaan oo yaqaana baahida waxbarashada gaarka ah, waxa aad gargaar ka heli kartaa adeegga iskaashiga waalidka ee degmada ama hay'adaha tabaruca ee heer qaran ama heer degmo, kuwaasoo ah badi hay'ado samofal. Waxa aad war dheeraad ah oo ku saabsan hay'adaha ku heli kartaa bogga 42. Qaybta golahaaga degmada (local council) ee masuulka ka ah waxbarashada – maamulka waxbarashada degmada (local education authority) (LEA) – ayaa kuu sheegi kara sidii aad ula xidhiidhi lahayd.

Baahida waxbarashada gaarka ah (special education needs) – waa maxay macnaheedu?

Ereyga 'baahi waxbarasho gaar ah' (special education needs) waxa uu leeyahay qeexid sharci. Caruurta leh **baahi waxbarasho gaar ah** waxay dhamaantood leeyihiin **dhibaatooyin waxbarasho** ama **naafo** keenaya in waxbarshu ku adag tahay marka la barbaro dhigo caruurta la da'da ah intooda badan.

Sharciyu waxa uu qorayaa inaan ilmuhu lahayn dhibaatooyin waxbarasho iyadoo kaliya sababu tahay afkooda koobaad oo aan ahayn Ingiriisi. Way jirtaa dhab ahaan inay ilmahaasi qaar ka mid ah ay dhici karto inay leeyihiin dhibaatooyin waxbarasho.

Waxa dhici karta in ilmaha leh baahi waxbarasho gaar ahi u baahan yihiin gargaar dheeraad ah taasoo ka imanayso dhawr baahiyood, sida xagga fikirka iyo fahmidda, dhibaatooyin jidh ama dareen, dhibaatooyin niyad iyo dhibaatooyin dhaqan, ama dhibaatooyin hadal iyo af ama sida ay ula macaamilaan ulana dhaqmaan dadka kale.

Caruur badan ayaa yeellan doona nooc ah baahi waxbarasho gaar ah wakhti uun inta ay waxbarashada ku jiraan. Dugsiyada iyo hay'adaha kale ayaa caruurta intooda badan ka caawin kara inay si dhakhso ah oo fudud uga gudbaan caqabadaha ay keenayaan dhibaatooyinka haysta. Laakiin caruur tiro yar ayaa u baahan doona gargaar dheeraad ah in ama dhamaan wakhtiga ay joogaan dugsiyada.

Sidaa daraadeed baahida waxbarashada gaarka ah waxa macnaheedu noqon karaa in ilmaha ay dhibaato ka haysato:

- dhamaan shaqada dugsiga
- akhriska, qorista, shaqada tirada ama fahmidda warka
- sheegista waxa ay doonayaan ama fahmidda waxa ay dadka kale leeyihiin
- sameysashada saaxiibada ama la macaamilista dadka waaweyn
- u-dhaqmidda si habon marka ay dugsiga joogaan
- nidaam u-yeellista naftooda
- nooc ah baahi dareeme ama jidh oo ku saameyn karta dugsiga

Kuwaasi waa tusaalooyin kaliya.

Gargarka la siinayo ilmaha leh baahi waxbarasho gaar ah waxa caadi ahaan lagu bixin doonaa goobaha waxbarashada hore ee caadiga ah ama dugsiga, iyadoo marmarka qaarkood la adeegsanayo gargaarka khubaro dibadda ka yimaada.

Dawladdu waxay dajisay Yoolka Waxbarashada Hore (Early Learning Goals) ee heerka aasaaska waxbarashada loogu talagalay ilmaha jira min 3 ilaa 5 sannadood oo ku saabsan waxa ilmaha intooda badan laga rabo inay sameyn karaan marka uu dhamaado sannad-dugsiyeedku. Manhajka Qaranka ee loogu talagalay ilmaha jira min 5 ilaa 16 ayaa isaguna qoraya waxa ilmaha intooda badan ay baran doonaan heer kasta oo ka tirsan waxbarashadooda.

Dhab ahaan xawaaraha waxbarashada ilmuhu waa uu kala duwan yahay waxana ay leeyihiin siyaabo kala duwan oo ay wax ku bartaan. Waxa macallimiinta laga filaya inay taa xisaabta ku daraan iyaga oo si taxadir leh u eegaya sida ay nidaam ugu yeellaan casharadooda, fasalka, buugaagta iyo alaabta ay siiyaan ilmo kasta iyo habka ay wax u baraan. Sidaa daraadeed waxa dhamaan macallimiintu ka fiirsan doonaan tiro ah xul la kala dooranao waxana ay dooran doonaan siyaabaha ugu haboon si ilmo kasta looga gargaaro hawlo dhawr ah. Waxa taa lagu sharaxaa badanaa 'kala-duwanaa ku-dabaqidda manhajka'.

Caruurta sameynaya horumar gaabinaya ama ay aag gaar ah ka haysato dhibaatooyin waxa la siin karaa gargaar dheeraad ah ama casharo ka duwan kuwii lagu talagalay si looga gargaaro inay guulaystaan. Tabaha

Far iyo Tiro Barashada Qaran (National Literacy and Numeracy Strategies) ayaa iyaguna siiya ilmaha fursado ay ku bartaan akhriska iyo qorista iyo fahmidda tirooyinka iyo xisaabta iyadoo la adeegsanayo siyaabo iyo xawaare kala duwan, waxana taa ku jira hawl ah 'gaadh' oo gaar ah iyo noocyo kale oo ah taageero.

Sidaa daraadeed ha ka soo qaadin, iyadoo sababtu tahay in ilmahaagu u sameynayo horumar ka gaabinaya intii aad filaysay ama iyadoo macallimiintu ay bixinayaan taageero nooc kale ah, gargaar ama hawlo ah fasalka dhexdiisa, in ilmahaag leeyahay baahi waxbarasho gaar ah.

Maxaa aad sameyn kartaa haddii aad ka walwalsan tahay in ilmahaaga ay dhibaatooyin haystaan?

Sannadaha hore ee ilmahaagu waa wakhti aad muhiim ugu ah korniinkii jidh, niyad, garaad iyo bulsho. Marka booqdaha caafimaadku ama dhakhtarku sameynayo baadhitaan caadi ah, waxa dhici karta inay ku taliyaan inay jiri karto dhibaato. Laakiin haddii aad qabtid walwal gaar kuu ah, waa inaad isla markiiba si toos ah u heshid la-talin.

Haddii ilmahaagu aanuu wali galin dugsiga ama aanu wali ku jirn hab waxbarasho hore, waxa aad la hadli kartaa dhakhtarkaaga ama booqde caafimad kaasoo ay suurogal u tahay inuu ku siiyo talo ku saabsan talaabooyinka taa xiga ee la qaadayo.

Haddii aad u malaynaysid in ilmahaagu u leeyahay baahi waxbarasho gaar ah oo aanuu garan dugsigu ama goobta waxbarashada hore, waa inaad si toos ah ula hadashid macallinka fasalka ee ilmahaaga, ama SENCO (oo ah qof jooga dugsiga ama goobta wax lagu baro caruurta aan gaadhin da'da dugsiga kaasoo ay masuuliyad gaar ahi ka saaran tahay isku-dabaridka gargaarka la siinayo caruurta leh baahi waxbarasho gaar ah) ama macallinka madaxa ah.

Haddii ilmahaagu u dhigto dugsi sare, waa inaad la hadashid macallinka horjoogaha u ah fasalka, SENCO, macallinka madaxa ah sannadkaa ama macallinka madaxa ah.

Waxa fiican inaad ku bilawdid macallinka ilmahaaga ama SENCO. Waxa suurogal kuu noqon doonta inaad kala hadashid walwalkaaga iyo inaad ogaatid waxa dugsiga fikradiisu tahay. Qofka ah SENCO ayaa kuu sharixi kara waxa dhici doona ee taa xiga.

La shaqeynta macallimiinta ilmahaagu waxay badanaa gargaar ka geysan doontaa xalinta walwalka iyo dhibaatooyinka. Hadba sida aad ula shaqeysid macallimiinta ayaa loogu guuleysan doonaa wixii gargaar ah ee la siinayo ilmahaaga.

Ogsoonow – adigaa dadka oo dhan ka yaqaana ilmahaaga.

Waxa dhici karta inaad jeclaatid inaad ogaatid:

- haddii dugsi u malaynayo in ilmahaagu leeyahay dhibaatooyin
- haddii dugsi u malaynayo in ilmahaagu leeyahay baahi waxbarasho gaar ah
- haddii ilmahaagu uu awood u leeyahay inuu ku shaqeeyo isla heerka ilmaha kale ee da'diisu ku shaqeeyaan
- haddii imminkaba ilmahaaga la siiyo gargaar dheeraad ah
- haddii aad caawin kartid ilmahaaga.

Hay'adaha kale ee aad gargaar ka heli kartid waa:

- adeegga iskaashiga waalidka ee ku yaalla degmadaada maamul (eeg bogga 51)
- adeegyada caafimaadka ilmaha
- adeegyada bulshada
- hay'adaha tabaruga ee degmada, badanaa hay'adaha samofalka.

Haqabtirka baahida waxbarashada gaarka ah

Heerka Dhaqanka Baahida Waxbarashada Gaarka ah (**Special Educational Needs Code of Practice**) waxa uu tilmaan-bixin siiyaa goobaha waxbarashada hore (early education settings) (eeg bogga 39), dugsiyada dawladda, LEA iyo qof kasta oo gargaar ka geysta garashada, qiimeynta iyo gargaar siinta ilmaha leh baahi waxbarasho gaar ah. Waxa uu xeerkaasi cadeeyaa hawlaha iyo hababka dhamaan hay'adaha laga rabo inay raacaan si ay u haqabtiraan baahida ilmaha. Waa inaanay iska indho-tirin tilmaan-bixinta Xeerka.

Waxa kale oo laga rabaa inay xisaabta ku daraan Xeerka marka ay qorayaan siyaasadahooda Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN)..

Waxa aad koobiyada Xeerka Dhaqanka Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN Code of Practice) ka heli kartaa Qaybta Waxbarashada iyo Farsamada (Department of Education and Skills) adiga oo tagaya rugta internetka DfES oo ah www.dfes.gov.gsi.uk/sen ama DfES Publications Centre oo lagala xidhiidho 0845 6022260.

Xeerku waxa uu sharaxayaa sida gargaarka loogu talagalay ilmaha leh baahi waxbarasho gaar ah ee lagu bixinayo dugsiyada iyo goobaha waxbarashada hore loo rabo in laga dhigo mid ah talaabo talaabo ama '**hab jaranjaro**' (graduated approach).

Waa maxay habka jaranjara ahi?

Waxa ay goobaha waxbarashada hore iyo dugsiyadu muhiimad weyn siiyaan goor hore garashada baahida waxbarashada gaarka ah si ay gargaar u siiyaan ilmaha wakhtiga ugu dhakhsaha badan. Marka go'aan laga gaadho in ilmahaagu u leeyahay Baahi Waxbarashada Gaarka ah , waa in macallimiinta ilmahaagu xisaabta ku daraan tilmaan-bixinta Xeerka Dhaqanka Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN Code of Practice). Waxa taa ku jira war lagaa siiyo adeegga iskaashiga waalidka ee degmada.

Habka jaranjarada ahi waxa uu ictiraafsan yahay in caruurta siyaabo kala duwan wax u bartaan ayna yeellan karaan heerar kala duwan oo ah Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN). Sida daraadeed, sida isa soo taraysa, oo talaabo talaabo ah, ayaa loo adeegsan karaa khibrad aqoon-yahan si dugsiyada looga gargaaro dhibaatooyinka hayn kara ilmaha.

Waa in dugsiyada kuu sheegaa marka ugu horeysa ee ay bixiyaan gargaar dheeraad ah ama gargaar nooc kale ah oo la siinayo ilmahaaga sababta oo ah ilmahaaga oo leh baahi waxbarasho gaar ah. Gargaarkaa dheeraad ah ama nooc kale ahi waxa uu noqon karaa hab kale oo loo baro waxyaabaha qaarkood, ama waxa uu noqon karaa isticmaalka qalab gaar ah sida kombiyuutar ama miis leh dul janjeedha.

Marka la joogo goobaha waxbarashada hore waxa gargaarkaa loogu yeedhaa **Hawl Sannadaha Hore (Early Years Action)**, marka la jooga dugsiyadana waxa loogu yeedhaa **Hawl Dugsi (School Action)**.

Waxa dhici karta in mudo yar ama dhawr sannadood ilmahaagu u baahan yahay gargaar iyadoo la marayo habka jaranjarada ah; xiitaa waxa dhici karta inuu u baahan yahay gargaaraka mudada ay waxbarashadu u socoto oo dhan.

Waa in lagu tashado talaabo kasta oo la qaadayo.

Dugsiyada kala duwani waxay Xeerka Dhaqanka (Code of Practice) ugu dhaqmi doonaan siyaabo kala duwan. Hase yeeshee, si kasta ha ahaato sida dugsi uu ugu dhaqmayo Xeerka, haddii ilmahaagu uu leeyahay Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN), waa in lagu tashado talaabo kasta oo la qaadayo. Waxa kale oo dugsi uu ka fiirsan doonaa fikradaha ilmahaaga. Waa in dugsiyadu u sheegaan waalidka wixii ku saabsan horumarka caruurtooda. Waxa aad xaq u leedahay inaad aragtid siyaasadda Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN) ee dugsi iyo inaad heshid koobiga warbixinta sannadlaha ah ee dugsi, taasoo ay ku jirto warbixin ku saabsan siyaasadda.

Macallinka ilmahaaga ayaa masuul ka ah inuu ilmahaaga ula shaqeeyo hab ah maalin-ka-maalin laakiin waxa dhici karta inuu go'aan ku gaadho inuu qoro hawlaha ama gargaarka loogu talagalay ilmahaaga e ku qoran Qorshaha Waxbarashada Qofka (Individual Education Plan) (IEP).

Waa in Qorshaha Waxbarashada Qofku (IEP) uu sheegayo:

- waxa uu yahay gargaarka gaarka ah ee la bixinayo
- inta jeer ilmahaagu ee heli doono gargaarka
- qofka bixin doona gargaarka
- waxa ay yihiin yoolka loogu talagalay ilmahaaga
- goorta iyo sida loo hubin doono horumarka ilmahaaga
- waxa uu yahay gargaarka aad ilmahaaga ku siin kartid guriga.

Waa in macallinka adiga iyo ilmahaaga kala hadlo Qorshaha Waxbarashada Qofka (IEP) haddii taasi suurogal tahay.

Qorsheyaasha Waxbarashada Qofka (IEP) waa caadi ahaan lala xidhiidhiyaa aagagga muhiimka ah ee afka, farta, xisaabta iyo dhaqanka iyo farsamooyinka bulshada. Marrarka qaarkood dugsi ama goobta waxbarashada hore ma qori doonto Qorshe Waxbarasho Qof (IEP) laakiin waxay diiwaangalin doonaan sida ay u haqabtirayaan baahida ilmahaaga

iyadoo la isticmaalayo hab nooc kale ah, iyadoo ay dhici karto in taasi ka tirsan thay qorsheyaasha casharka, waxana ay horumarka ilmahaaga u diiwaangalin doonaan isla habka ay ugu diiwaangaliyaan caruurta kale oo dhan. Laakiin waa in mar kasta dugsi awoodi karo inuu kuu sheego sida ay u gargaarayaan ilmahaaga iyo horumarka ay sameynayaan kuuna sharaxaan sababta aanay u qorin Qorshe Waxbarasho Qof (IEP).

Ogsoonow – waxa muhiimka ahi waa sida loo gargaaro ilmahaaga ee ma aha habka uu dugsi uu qoray.

Haddii ilmahaagu aanuu sameynin horumar ku filan, waa in macallinka ama SENCO kaala hadlo sidii talo loo weydiisan lahaa dadka ka baxsan dugsi. Waxa dhici karta inay damcaan inay gargaar weydiistaan, tusaale ahaan, macallin takhasusle ah, aqoon-yahan cilmi-nafsi, daweeye hadal iyo af ama xirfadleyaal caafimaad oo kale. Waxa gargaarka noocan ah loogu yeedhaa **Hawl Sannadaha Hore oo Dheeraad ah (Early Years Action Plus)**, ama **Hawl Dugsi oo Dheeraad ah (School Action Plus)**.

Waa in SENCO isku dayo in lagugu daro wixii wada-hadalo ah, waana inuu ka fiirsado ra'yigaaga sida marka ay gaadhayaan go'aamo ku saabsan sida ugu fiican ee loo gargaari karo ilmahaaga. Waa inay kula socodsiiyaan horumarka ilmahaaga.

Xeerka Dhaqanka Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN Code of Practice) waxa uu aad u cadeeyay muhimadda ay leeyihiin goobaha waxbarashada hore, LEA iyo waalidka oo wada-jir u shaqeynaya. Waa in waalidku helaan fursado badan oo ay ku ogaadaan waxa dhacaya.

Ra'yigaagu waa mid aad u muhiim ah wakhti kasta.

Marka wixii ah walwal ama su'aalo ee aad qabtid aad kala hadashid dadka jooga goobaha waxbarashada hore, macallinka fasalka, SENCO ama macallinka madaxa ah ayaa waxa xal loo heli doonaa wixii walwal ama isfaham la'aan ah.

Ka waran haddii aanad raalli ka ahayn goobaha waxbarashada hore (early education settings) ama dugsiga?

Adeegyada iskaashiga waalidku waxay kaa caawin karaan inaad sheegtid ra'yigaaga waxana ay ku siin karaan taageero mar kasta oo aad u baahan tahay.

Haddii aanad raalli ka ahayn wax uu dugsigu u qabtay ilmaaga, waa inaad marka hore la hadashid SENCO ama macallinka fasalka ilmahaaga ama macallimiinta maadooyinka dhiga. Waxa kale oo aad la hadli kartaa macallinka madaxa ah. Marmarka qaarkood waxa dhici kara isfaham la'aan. Waxa muhiim ah inaad intii suurogal ah iskaashi la yeelatid dugsiga ilmahaaga marka laga hadlayo wax ku saabsan Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN) u leeyahay ilmahaagu. Waxa dhici karta inay wax ku tarto qorista wixii ah walwal ka hor intaanad iman shirka ama, haddii aad doonaysid, waxa aad soo kaxaysan kartaa saaxiib ama qaraabo. Waxa kaloo dhici karta inaad waxtar ka heshid la hadlista waalidka kale. Dugsiga ilmahaaga ayaa awoodi kara inuu kugu xidhiidhiyo adeegga iskaashiga waalidka ee degmada oo ku siin kara magacyada hay'adaha tabaruca ee degmada iyo kooxaha waalidka ee laga yaabo inay ku caawin karaan.

Haddii adiga iyo dugsiga dawladdu aydun wali is khilaafsan tiyiin ka dib marka aad wada hadashaan, waxa aad xor u tahay:

- inaad gargaar iyo taageero ka heshid adeegga iskaashiga waalidka ee degmada
- inaad heshid adeeg xalin khilaaf oo dabacsann oo uu bixiyo Maamulka Waxbarashada Degmadaaga (LEA) (Eeg boggaga 51-54).

Qiimeynta iyo cadeynta

Waa in dhamaan caruurta leh baahi waxbarasho gaar ah la siiyo waxbarasho balaadhan oo si fiican isugu miisaaman.

Caruur badan ayaa, wakhti uun yeellan doona baahi waxbarasho oo gaar ah oo ah nooc uun. Sharcigu waxa uu qorayaa in dhamaan dugsiyada dawladdu ay sameeyaan dadaalkooda ugu wacan si ay u arkaan in gargaar gaar ah la siiyo dhamaan caruurta leh Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN). Caruurta intooda badan waxa baahidooda la haqabtiri karaa iyadoo la isticmaalayo dugsiga caadiga ah, marmarka qaarkoodna iyadoo la adeegsanayo gargaar laga helo takhasusleyaal dibadda ah. Marrar dhif ah qaarkood, waxa loo baahdaa in maamulka waxbarashada degmadu (local education authority) (LEA) uu **qiimeyn** ku sameeyo baahida waxbarasho ee ilmaha, taasoo ku salaysan talada laga helo takhasusle. Haddii LEA ay ka dib go'aan ku gaadho in ilmuhu u baahan yahay gargaar gaar ah, waa inay qoraan **cadeyn baahi waxbarasho gaar ah (statement of special educational needs)** – taasoo caadi ahaan loogu yeedho 'cadeyn' (statement). Waxay taasi sharaxaysaa dhamaan baahida ilmaha iyo dhamaan gargaarka gaarka ah ee uu u baahan yahay. Caadi ahaan dugsiga caadiga ah ee ilmaha iyo LEA ayaa bixin kara gargaar ka iyadoo taageero laga helayo LEA.

Haddii ilmahaagu wali uu u eeg yahay mid aan sameynaynin horumar ku filan ama uu u baahan yahay gargaar dheeraad ah oo badan, waxay LEA go'aan ku gaadhi kartaa inay sameeyaan qiimeyn sii faahfaahsan oo ku saabsan baahida ilmahaaga.

•

Dugsiga ilmahaaga ama goobta waxbarashada hore ayaa weydiin karta LEA inay sameeyaan qiimeyn faahfaahsan (statutory assessment) (eeg qaybta soo socota). Waa inay mar kasta kula hadlaan ka hor intaanay weydiin LEA.

Ama

- Haddii aad dareensan tahay in dugsiga ilmahaagu ama goobta waxbarashada hore aanay bixin karin dhamaan gargaarka dheeraadka ah ee ilmahaagu u baahan yahay, ama haddii ilmahaagu aanuu sameynaynin horumar ku filan sidaa daraadeedna uu dib uga dhacayo ilmaha kale ee da'diisa, waxa aad LEA weydiisan kartaa inay sameeyaan qiimeyn faahfaahsan.

Waa inaad mar kasta la hadashid macallimiinta ilmahaaga ama SENCO ka hor intaan la weydiisan LEA. Waxa aad mar kasta weydiisan kartaa inay kaa caawiyaan in warqad loo qorto LEA, ama waxa aad gargaar weydiin kartaa adeegga iskaashiga waalidka ee degmada ama hay'ad tabaruc.

Waa maxay qiimeyn faahfaahsani (statutory assessment)?

Taasi waa baadhitaan faahfaahsan oo loogu talagalay in lagu ogaado waxa ay si sax ah u tahay baahida waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga iyo waxa uu yahay gargaarka gaarka ah ee ilmahaagu u baahan yahay. Qiimeyn faahfaahsani waxa kaliya ee lagama-maarmaan tahay haddii dugsiga ama goobta waxbarashada hore aanay bixin karin dhamaan gargaarka uu ilmahaagu u baahan yahay.

Marka adiga, goobta waxbarashada hore ama dugsiga ay LEA weydiyaan inay sameeyso qiimeyn faahfaahsan, waxa caadi ahaan LEA ay haysataa lix todobaad oo go'aan ay kaga gaadhi karaan inay sidaa sameeyaan iyo in kale. Waxay si taxadir leh uga fiirsan doonaan horumarka ilmahaaga xagga dugsiga iyo tilmaan-bixinta Xeerka Dhaqanka Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN Code of Practice). Waxa kale oo ay dhageysan doonaan ra'yigaaga iyo ra'yiga dugsiga ilmahaaga ee ku saabsan baahida waxbarashada gaar ah ee u leeyahay ilmahaagu. Dugsiga ama goobta waxbarashada hore ayaa LEA u soo sheegi doona wixii ah gargaar gaar ah ee hore loo siiyay ilmahaaga.

Ogsoonow – adeegga iskaashiga waalidka ee degmadu waxa uu meesha u joogaa inuu ku caawiyo wakhti kasta.

Mudo intee leeg ayaad sugi doontaa in LEA go'aan ka gaadho in ilmahaaga loo sameeyo qiimeyn iyo in kale?

Waxa LEA ay eegi doontaa codsiga qiimeyn faahfaahsan waxana ay kuu sheegi doonaan (caadi ahaan gudaha lix todobaad) in ay sameyn doonaan qiimeyn iyo in kale.

Isla wakhtiga ay LEA bilawdo inay eegto codsiga qiimeyn faahfaahsan waxay kuu soo qori doonaan warqad waxana:

- ay kuu sheegi doonaan inay ka fiirsanayaan inay sameeyaan qiimeyn faahfaahsan iyo in kale
- ay kuu sheegi doonaan sida ay u sameyn doonaan qiimeyn faahfaahsan haddii mid la sameynayo
- ay kuu sharixi doonaan qiyaasta wakhtiga (oo aan ka badan doonin lix bilood dhamaantii)
- ay ku siin doonaan magaca qofka jooga LEA ee noqon doona qofka aad la xidhiidhaysid (Sarkaalka la Magacaabay) (The Named Officer)
- ay ku weydiin doonaan inaad bixisid sababo qoran ama afka ah, oo la yidhaahdo 'marag', oo ku saabsan sababta aad ugu malaynaysid in ilmahaaga loo sameeyo qiimeyn ama aan loo sameynin (waxa aad haysataa ugu yaraan 29 cisho oo aad taa ugu soo dirtid LEA)
- ay kuu sheegaan warka adeegga iskaashiga waalidka ee LEA kaasoo awoodi kara inuu kugu gargaaro talo madax-banaan iyo taageero
- waxay ku weydiin karaan haddii uu jiro qof kale oo aad si gaar ah u jeceshahay in LEA ay kala hadasho ilmahaaga
- waxay ku weydiin karaan wixii ah marag ama ra'yi ee aad soo ururisay ama aad ku talo-jirtid inaad heshid
- ay kugu dhiirigalin karaan inaad bixisid marag ah qoraal ama hadal oo ay ka fiirsato LEA (LEA ama adeegga iskaashiga waalidka ayaa kaa caawin kara sidii aad u sameyn lahayd marag qoraal ah).

LEA waxay haysataa lix todobaad oo ay kuugu sheegto inay sameyn doonaan qiimeyn faahfaahsan oo ku saabsan ilmahaaga. Haddii LEA ay qaadato wakhti ka badan lix todobaad, waa inaad weydiisid Sarkaalka la Magacaabay (Named Officer) (eeg bogga 39) inuu kuu sharaxo daahista ama dib-u-dhaca.

Haddii aanad ku faraxsanayn jawaabta ama sababta daahista, waxa aad la hadli kartaa adeegga iskaashiga waalidka ee degmada ama waxa aad LEA weydiin kartaa inay soo qabanqaabiyaan in khilaafka loo xaliyo si dabacsan iyadoo la marayo qof madax-banaan.

Waxa kama-dambays ahaan aad u dacwoon kartaa Xoghayaha Waxbarashada iyo Farsamada ee Dawladda (Secretary of State for Education and Skills) adiga oo ka dacwoonaya daahista aan caqli-galka ahayn. Xoghayaha Dawladdu waxa uu LEA u sheegi karaa in laga rabo inay sameeyaan qiimeyn faahfaahsan iyo in kale. LEA ama adeegga iskaashiga waalidka ayaa awoodi kara inay ku siiyaan faahfaahinta sida loo sameeyo dacwad ku saabsan daahis noocaasaa.

Maxaad sameyn kartaa haddii LEA ay go'aan ku gaadho inaanay qiimeyn u sameynaynin ilmahaaga?

Haddii LEA go'aan ku gaadho inaanay sameynaynin qiimeyn faahfaahsan oo ilmahaaga ku saabsan, waa inay warqad soo qoraan oo ay u sheegaan adiga iyo dugsiga sababhooda. Waxa dhici karta in adiga ama dugsigu ay wali dareensan yihiin in loo baahan yahay wax dheeraad ah si loo haqabtiro baahida waxbarashada ilmahaaga. Waa inaad la hadashid dugsiga si aad u ogaatid wixii la sameyn karo. Waxay ka fiirsan karaan habab kala duwan ama gargaarka dibadda ayaa haboonaan kara. Waxa kale oo aad la hadli kartaa adeegga iskaashiga waalidka ee degmada.

Xiitaa haddii LEA ay go'aan ku gaadho in ilmahaagu aanuu u baahnayn qiimeyn faahfaahsan, ilmahaagu waxa uu wali heli karaa gargaar dheeraad ah.

Haddii LEA ay go'aan ku gaadho inaanay sameynaynin qiimeyn faahfaahsan, waxa aad xaq u leedahay inaad racfaan ama ambiil u qaadatid Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah (Special Education Needs Tribunal) haddii aanad raalli ka ahayn go'aanka LEA.

Waa in LEA kuu sheegto nidaamyada degmada ee loogu talagalay in wixii ah khilaaf loo xaliyo si dabacsan ama si aan maxkamad ahayn, sidoo kale waa in lagu sheego xaq aad u leedahay racfaan aad u qaadatid Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah iyo xadka wakhtiga qaadashada racfaanka. Waxa muhiim ah inaad wixii ah racfaan aad u gudbinaysid Maxkamadda bilawdid gudaha xadka wakhtiga ah sababta oo

ah waxay u badan tahay in Maxkamaddu diido inay dhageysato racfaankaaga haddii aad daahdid.

Qiimeynta

Caruur aad u tiro yar ayaa u baahan qiimeyn faahfaahsan.

Haddii LEA ay sameyso qiimeyn, waxay weydiin doonaan tiro ah xirfadleyaal inay bixiyaan ra'yigooda ku saabsan ilmahaaga. Waxay LEA talo weydiisan doontaa:

- dugsiga ilmahaaga ama goobta waxbashada hore
- aqoon-yahan cilmi-nafsi oo waxbarashada qaabilsan
- dhakhtar
- adeegyada bulshada (oo iyagu bixin doona talo kaliya haddii ay yaqaanaan ilmahaaga)
- qof kaloo kasta oo ay LEA u haysato in taladiisu haboon tahay.

Waxa aad xaq u leedahay inaad joogtid wareysi kasta oo la qaadayo, baadhitaan caafimaad ama baadhitaan kale inta ay socoto qiimeynta faahfaahsani, laakiin marmarka qaarkood waxa dhici karta in xirfadleydu codsadaan inay arkaan ilmahaaga adiga oo aan joogin. Marmarka qaarkood ilmuhu waxay u dhaqmaan si kale marka waalidku joogo meesha.

Waxa kale oo lagu weydiin doonaa fikradahaaga mar kale – taasi way ka duwan tahay marka lagu weydiinayo inaad u malaynaysid in ilmahaaga la qiimeeyo iyo in kale.

Waa inaad dareentid inaad u madax-banaan tahay inaad ku talisid dad ama hay'ado kale oo aad ogtahay in fikradahoogu ay gargaar ka geysan karaan qiimeynta ilmahaaga. Waa in LEA ka dib weydiiso fikradahooga. Waxa kale oo aad LEA u soo diri kartaa wixii ah talo gaar ah ama fikrado aad soo ururisay ee ku saabsan ilmahaaga waana in LEA ay kuwaa xisaabta ku darto kana soo qaado inay yihiin qayb ka tirsan qiimeynta.

Waxa aad leedahay door muhiim ah oo aad ciyaartid sababta oo ah waa adiga qofka sida ugu fiican u yaqaana ilmahaaga.

Si fiican ayaa fikradahaaga loo soo dhaweyn doonaa waana inaad dareentid inaad xor u tahay inaad su'aal sheegatid wakhti kasta. Adeegga iskaashiga waalidka ama sarkaal ka socda LEA ayaa ku gargaari kara. Aad bay muhiim u yihiin walwalkaaga, ra'yigaaga iyo aqoonta aad u leedahay ilmahaaga – waa adiga qofka sida ugu fiican u yaqaana ilmahaaga.

LEA ayaa kaa caawin doonta inaad ka fikirtid sidii aad u bixin lahayd ra'yigaaga. Waxa dhici karta inay leeyihiin tilmaan-bixin kaa caawin doonta inaad ka qaybqaadatid qiimeynta ilmahaaga. Waxa muhiim ah inaad heshid in alaale intii talo iyo taageero aad dareensan tahay inaad u baahan tahay. Waxa dhici karta inaad doonaysid inaad ka fiirsatid weydiinta:


- adeegga iskaashiga waalidka ee degmada
- hay'adaha tabaruca ee la shaqeeya caruurta iyo dadka da'da yar
- kooxaha kale ee taageerada waalidka.

Waa in Sarkaaalka la Magacaabay (Named Officer) ama LEA ay gargaar ka geystaan sharaxaadda habka qiimeynta. Waa inaad dareentid inaad xor u tahay inaad la xidhiidhi kartid wakhti kasta. Waxa kale oo jira liis ah adreesyada faa'iidada leh oo ku yaalla dhamaadka buuggan yar.

Si aad LEA uga caawisid inay sameeyaan qiimeyn degdeg ah, marka ay ku weydiyaan waxa aad u malaynaysid, waa inaad isku daydid inaad ku jawaabtid gudaha lix todobaad. Waxa dhici karta in LEA ku siiso wakhti kama-dambays ah oo aad ku bixisid ra'yigaaga. LEA ayaa kuu sheegi doonta haddii taasi jirto, waxana uu wakhtiga kama-dambaysta ahi noqon doonaa 29 cisho ama wax ka badan.

Waxa kaloo dhici karta in LEA ku weydiiso fikrada uu ilmahaagu ka haysto Baahidiisa Waxbarashada Gaar ah (SEN). Fikrada uu ilmahaagu haysto waxay qayb weyn ka qaadan kartaa qiimeynta LEA. Haddii ilmahaagu u baahan yahay in gargaar laga siiyo sidii uu ra'yigiisa u siin lahaa LEA, waxa gargaar bixin kara adiga, macallin ama xirfadle kale.

Qiyaasta wakhtiga qiimeynta



Calaamada Kiristal (Crystal Mark) ee 'Plain English Campaign' ma khuseyso shaxankan.

Waxa dhici karta inay jiraan dhawr ka-reebitaan oo qabanaya jadwalkan wakhti marka wakhtiga guud ay dhici karto inaanuu ka badnayn 26 todobaad. Haddii ay u badan tahay in taasi dhacdo, LEA ayaa kuu sheegi doonta sababta keentay daahista.

Maxaa dhaca ka dib qiimeynta?

Cadeyn baahi waxbarasho gaar ahi waxay sheegaysaa baahida ilmahaaga iyo dhamaan gargaarka gaarka ah ee la rabo inuu helo.

Marka Saraakiisha Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN) ee xafiiskaaga LEA ay soo ururiyeen dhamaan talada iyo faalooyinka ku saabsan baahida waxbarashada ilmahaaga, waxay go'aan ku gaadhi doonaan inay ilmahaaga u sameeyaan cadeyn Baahi Waxbarashada Gaar ah (SEN) iyo in kale. Waxay caadi ahaan go'aankoodu kuu sheegi doonaan wakhti aan ka badnayn 12 todobaad ka dib marka ay go'aan ku gaadhaan inay sameeyaan qiimeyn.

Ka dib qiimeynta waxay LEA go'aan ku gaadhi kartaa inay lagama-maarmaan tahay inay ku qoraan dhamaan warka ay soo ururiyeen dukumenti la yidhaahdo **cadeynta baahida waxbarashada gaarka ah (statement of special educational needs)** (oo badanaa loogu yeedho cadeyn (statement)).

Waa in LEA ay caadi ahaan warqad kuu soo qoraan kuuna sheegaan haddii ay qori doonaan cadeyn gudaha 12 todobaad oo ka bilaabmaya marka la bilaabo qiimeynta.

Haddii LEA go'aan ku gaadho inaanay sameynin cadeyn, waxay sharixi doonaan sababhooda kuuna sheegi doonaan sida ay u malaynayaan in baahida ilmahaaga ay tahay in loo haqabtiro iyadoo la isticmaalayo dugsiga, goob waxbarasho hore ama hab kale.

Ka waran haddii aanad raalli ka ahayn go'aanka LEA?

Waa in LEA kuu sheegto ku-talogalka heer degmo ee loogu talagalay xalinta khilaafka iyo xaqa aad u leedahay racfaan aad u qaadatid Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah (Special Educational Needs Tribunal). Waxa aad xaq u leedahay inaad racfaan u qaadatid Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN Tribunal) xiitaa haddii aad isticmaalaysid adeegga xalinta khilafka (disagreement resolution service) (eeg bogga 36).

Waa maxay cadeyn?

Cadeyntu waxay sharixi doontaa dhamaan Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN) ee ilmahaaga iyo gargaarka gaarka ah ee la rabo in ilmahaaga la siiyo. Caadi ahaan LEA waxay sameyn doontaa cadeyn haddii ay go'aan ku gaadhaan in dhamaan gargaarka gaarka ah ee ilmahaagu u baahan yahay aan laga bixin karin adeegyada dugsiga. Adeegyadaa waxa ku jira kara lacag, wakhti shaqaale iyo qalab gaar ah.

Cadeynta Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN) waxay u kala qaybsan tahay lix qaybood.

Qaybta 1 waxay sheegaysaa magacaaga iyo adreskaaga iyo ka ilmahaaga, iyo taariikhda dhalasho ee ilmahaaga, afka guriga iyo diinta. Waxa kale oo ay liis ku qoraysaa dhamaan talada LEA ay heshay ee ka tirsan qiimeynta.

Qaybta 2 waxay bixinaysaa faahfaahinta dhamaan Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN) ee ilmahaaga sida lagu muujiyay qiimeynta faahfaahsan.

Qaybta 3 waxay sharaxaysaa:

- dhamaan gargaarka gaarka ah ee LEA u malaynayso in ay tahay in la siiyo ilmahaaga si loo haqabtiro baahida ku taxan qaybta 2
- waxa ay ulajeedooyinka mudada dheer yihiin
- ku-talogalka loogu talagalay sameynta yool mudo gaaban, sidii si joogto ah dib-u-fiirin loogu sameyn lahaa horumarka ilmahaaga xagga yoolkaa, iyo sida horumarka ilmahaaga loola socon karo.

Qaybta 4 waxay kuu sheegaysaa war ku saabsan dugsiga uu ilmahaaga tagi doono si uu u helo gargaarka gaarka ah ee lagu sheegay qaybta 3, ama sida wixii ah ku-talogal loo qaban doono saacadaha dugsiga ama looga hirgalin doono goobaha ka baxsan dugsiga.

Qaybta 5 waxay sharaxaysaa wixii ah baahi aan waxbarasho ahayn ee u leeyahay ilmahaagu, sida ay ka heshiiyeen LEA iyo adeegyada caafimaadka, adeegyada bulshada ama hay'adaha kale.

Qaybta 6 waxay sharaxaysaa sida ilmahaagu u heli doono gargaar si loo haqabtiro baahida aan waxbarasho ahayn ee lagu sharaxay qaybta 5.

Waa in LEA cadeynta la soo dirto koobiyada dhamaan talada ay ka helaan adiga iyo dadka iyo hay'adaha kale intii ay socotay qiimeynta faahfaahintu.

Maxaa dhici doonaa marka cadeyn loo diyaariyo ilmahaaga?

Ka hor intaan saraakiisha Baahida Waxbarashada Gaar ah (SEN) ee LEA aanay qorin cadeyn kama-dambays ah, waxay kuu soo diri doonaan 'cadeyn lagu taliyay' (proposed statement) – taasoo ah cadeyn qabyo ah. Waxa la buuxin doonaa dhamaan qaybaha kor lagu taxay, marka laga reebo qaybta 4 (ee sharaxaysa nooca iyo magaca dugsiga) oo laga tagi doono iyadoo banaan.

Waxa koobiga cadeynta qabyada ah ay LEA kuu soo raacin doontaa warqad kuu sheegaysa sida aad u sheegi kartid ra'yigaaga ku saabsan cadeynta lagu taliyay ka hor intaan laga dhigin kama-dambays. Ra'yigaaga waa la soo dhaweynayaa. Waxa dhici kartaa inaad ka fiirsatid sidii aad u heli lahayd gargaar iyo taageero dheeraad ah marka la joogo heerkan.

Ma dooran kartaa dugsiga ilmahaaga?

Waxa LEA ay kuu soo diri doontaa faahfaahinta dugsiyada ku haboon caruurta leh baahi waxbarasho gaar ah.

Waxay LEA kuu soo diri doontaa faahfaahinta dugsiyada caadiga ah iyo kuwa gaarka ah ee ku yaalla aaggaaga. Waxa kale oo ay kuu soo diri doonaan liiska dhamaan dugsiyada loo yaqaano dugsiyada gaarka ah ee ah ah nooc 'aan la taageerin' (non-maintained) iyo dhamaan dugsiyada madaxa-banaan ee u aqbalsan yahay Xoghayaha Waxbarashada iyo Farsamada ee Dawladdu (Secretary of State for Education and Skills) inay yihiin kuwo ku haboon ilmaha leh Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN).

Waxa aad xaq u leedahay inaad sheegtid dugsiga dawladda ee aad doonaysid in ilmahaagu tago, kaasoo ah mid caadi ah ama gaar ah. Waxa dhici karta in kaasi yahay ka uu haddaba tago ilmahaagu. **Waa in** LEA ay ogaalato doorashadaada in alaale inta:

- dugsiga aad dooratid uu ku haboon yahay da'da, awoodda, farsamada iyo Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN) ee ilmahaaga;
- aan joogista ilmahaagu aanay wax yeelli doonin waxbarashada caruurta kale ee hore u sii joogtay dugsiga; iyo
- ay meeleynta ilmahaaga lagu meeleeyo ama la geeyo dugsiga ay tahay isticmaal wacan oo lagu sameeyay adeegyada LEA.

Dugsiyada gaarka ahi waxay caadi ahaan qaataan ilmaha leh noocyo gaar ah oo ah baahi gaar ah. Waxa kale oo jirta in dugsiyada badan oo caadi ahi ay leeyihiin ku-talogal gaar ah oo loogu talagalay caruurta leh baahi gaar ah. Tusaale ahaan, waxa dhici karta inay leeyihiin hab galis dhisme oo loogu talagalay ardayda leh naafo jidhka ah ama ay leeyihiin waxbarasho loogu talagalay ardayda leh dhibaatooyin maqalka ama aragga ah ama dhibaato ah xagga akhriska iyo qorista. Waxa aad weydiisan kartaa inaad aragtid siyaasadaha dugsiyada xagga Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN) si aad u ogaatid waxa ay bixin karaan. Waxa kale oo aad booqan kartaa tiro ah dugsiyada haddii aad sidaa doonaysid. Waxa LEA ay kuu soo diri doontaa faahfaahinta sida aad ugu sheegi kartid ka uu yahay dugsiga aad doonaysid.

Waxa dhici karta inaad doonaysid in ilmahaagu tago dugsi aanuu maamulin LEA – dugsi gaar ah oo aan la taageerin ama dugsi madax-banaan oo haqabtiri kara baahida ilmahaaga. Waxay LEA si taxadir leh uga fiirsan doonta rabitaankaaga ka hor intaan la gaadhin go'aan kama-dambays ah laakiin, haddii uu jiro dugsi dawladeed oo haboon, LEA ma hayso wado ay ku oggalaato in lacagta dadweynaha lagu bixiyo dugsi aan la taageerin ama madax-banaan oo ilmahaagu tago.

Go'aan ka-gaadhista dugsigii ilmahaagu tagi lahaa waa arrin muhiim ah. Mar kale, waxa muhiim ah inaad weydiisatid heshidna dhamaan warka, gargaarka iyo talada aad u baahan tahay, iyo inaad ka hadashid wixii ah walwal ee aad qabtid. Xafiiskaaga LEA iyo adeegga iskaashiga waalidku waxay ku farxi doonaan inay ku gargaaraan.

Ka hor intaanay sameyn cadeynta kama-dambaysta ah, waxa LEA ay soo qabanqaabin doonta kulan lagula yesho si looga hadlo rabitaankaaga.

Ogsoonow inuu ku soo raaci karo qof ah saaxii, qaraabo ama taageere waalid oo madax-banaan marka aad soo booqanaysid dugsiyada ama aad la kulmaysid LEA. Waxa kaloo dhici karta inaad doontid inaad la hadashid waalidka kale iyadoo la marayo hay'adaha tabaruca ee degmada iyo kooxaha waalidka.

Waxa LEA laga rabaa inay la tashadaan dugsiyada ka hor intaan lagu magacaabin cadeynta, laakiin LEA ayaa sameysa go'aanka kama-dambaysta ah. Si buuxda ayay kuu wargalin doonaan waxana mar walba ay kuu sharixi doonaan go'aankooda.

Haddii aanad doonaynin inaad sheegtid magaca dugsi laakiin aad doonaysid in ilmahaagu tago dugsi dawladeed oo caadi ah, waa inaad sidoo kale u sheegtid LEA.

Ka dibna waa inay siiyaan ilmahaaga meel ah dugsi caadi ah in alaale inta:

- tagista ilmahaagu tago meeshaa aanay waxyeello u geysanaynin waxbarashada ilmaha kale ee hore u joogay dugsiyada; iyo
- aanay jirin talaabooyin waxqabad ah oo dugsi ama LEA ay sameyn karaan si loo joojiyo in joogista ilmahaagu saameeyso waxbarashada ilmaha kale.

Mudo intee leeg ayaad haysataa oo aad faallo ku sameysid?

Marka LEA kuu soo dirto cadeyn qabyo ah, waxa aad haysataa 15 cisho oo aad kaga faalootid dhamaan qaybaha cadeynta -- iyo inaad sheegtid dugsiyada dawladda, ama dugsiyada gaarka ah ee aan la taageerin ama dugsiyada madax-banaan ee aad doonaysid in ilmahaagu tago.

Waxa aad weydiisan kartaa kulan aad la yeelatid LEA si looga wada hadlo cadeynta qabyada ah. Kulanka ka dib waxa aad haysataa 15 cisho oo aad ku weydiisan kartid kulanno kale oo aad la yeelatid LEA. Inta lagu jiro gudaha 15 cisho oo ka bilaabmaya kulankaagii ugu dambeeyay ee aad la yeelatay LEA, waxa aad awoodi kartaa inaad wixii ah faallo dheeraad ah ee aad haysid soo dirtid, LEA na way ka fiirsan doontaa. Haddii aad doonaysid wakhti dheeraad ah oo aad faallo ku sameysid, waa inaad la hadashid Sarkaalka la Magacaabay (Named Officer).

Goorma ayay LEA sameyn doontaa cadeynta ugu dambeysa?

Caadi ahaan, waa in LEA ay sameeyso cadeynta ugu dambeysa sideed todobaad gudahood marka la sameeyo cadeynta qabyada ah. Waxay kuu soo diri doonaan koobiga cadeynta waxana ay noqon doonta mid qaybta 4 lagu buuxiyay magacaga dugsi.

Cadeyntu waxay hirgalaysaa isla wakhtiga ay LEA sameeyso. Marka laga bilaabo wakhtigaa waa in LEA ay dugsiyada ilmahaaga siiso wixii ah adeegyo dheeraad ah ee dugsiyada u baahan yahay. Waa in maamuleyaasha dugsiyada ay sameeyeen dadaalkooda ugu wacan si loo habsado in ilmahaagu helo gargaarka waxbarasho ee gaarka ah ee lagu qoray cadeynta.

Ka waran haddii LEA ay go'aan ku gaadho in ilmahaagu aanuu u baahnayn cadeyn?

Haddii aanad raalli ka ahayn waxa ku qoran cadeynta, waa inaad marka ugu horeysa sharaxaad weydiisid Sarkaalkaaga la Magacaabay (Named Officer) ee jooga LEA. Waxa kale oo faa'iido yeellan kara la-hadalka adeegga iskaashiga waalidka ee degmadaada. Haddii aanad wali ku faraxsanayn, waxa aad xaq u leedahay inaad racfaan u qaadatid Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah (Special Educational Needs Tribunal) adiga oo ka dacwoonaya waxa ku qoran:

- qaybta 2, sharaxaadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN) ee ilmahaaga
- qaybta 3, gargaarka la siinayo Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN) ee ilmahaaga
- qaybta 4, nooca iyo magacaga dugsiga la rabo in ilmahaagu tago.

Waa in LEA kuu sheegto ku-talogalka degmada ee loogu talagalay xalinta khilaafka iyo xaq aad u leedahay racfaan aad u qaadatid Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN). Waxa aad xaq u leedahay inaad racfaan u qaadatid Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah xiitaa haddii aad isku dayaysid in khilaafka idinka dhexeeya LEA loo xaliyo si dabacsan (eeg bogga 36).

Xusuuso haddii aad dooratid inaad racfaan u qaadatid Maxkamad, waxa jira xad wakhti la rabo in aad taa ku sameysid.

Ka waran haddii aanad raalli ka ahayn go'aanka LEA?

Xiitaa haddii LEA aanay sameynin cadeyn, waxay adiga iyo dugsiga u soo diri karaan koobiyada dhamaan talada ay ka heleen adiga iyo dadka kale iyo hay'adaha mudada ay socoto qiimeynta faahfaahsan.

Qiimeynta ka dib, waxay LEA go'aan ku gaadhi kartaa in dugsiga ilmahaagu awoodi karo inuu bixiyo gargaarka gaarka ah ee loogu talagalay Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN) ee ilmahaaga iyada oo aan loo baahan cadeyn. Waxay LEA caadi ahaan go'aanka kuu sheegi doontaa gudaha 12 todobaad marka la bilaabo qiimeynta faahfaahsan.

Waxa LEA ay wax badan ka baran doontaa baahida ilmahaaga marka la sameeyo qiimeynta faahfaahsan. Xiitaa haddii ay go'aan ku gaadhaan inaanay sameyn qiimeyn, waa inay adiga iyo dugsiga ilmahaaga la wadaagaan wax ay ogaadeen. Ka dib waxa dhici karta in LEA ay qorto waxa loogu yeedho '**xusuus beddelaysa cadeyn**' (note in lieu of a statement).

Dib-u-fiirinta cadeynta ee sannadlaha ah

Haddii aad u malaynaysid in go'aanka LEA u khalad yahay lana rabo inay cadeyn u sameeyaan ilmahaaga, waa inaad marka ugu horeysa la hadashid LEA iyo dugsiga. Waxa kale oo aad xaq u leedahay inaad weydiisid LEA xal dabacsan oo lagu xaliyo khilaafka, sidoo kalena waxa aad xaq u leedahay inaad racfaan u qaadatid Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah. Waxa aad ikhtiyaarkaa kala hadli kartaa adeegga iskaashiga waalidka ee degmadaada.

Dib-u-fiirinta cadeynta ee sannadlaha ah

Waa in LEA ay hubiso horumarka ilmahaaga una hubsato in cadeyntu sii ahaato mid haqabtiraysa Baahida Waxbarashada Gaarka ah (SEN) ee ilmaha. Waa inay dib u fiiriyaan cadeynta **ugu yaraan** mar sannadkii, laakiin in intaa ka badan ayay dib u fiirin karaan haddii ay u malaynayaan in taasi lagama-maarmaan tahay.

Dib-u-fiirinta sannadlaha ah waxay u kala qaybsan tahay afar qaybood:

- ururinta warka
- qabashada shir dib-u-fiirin oo sannadle ah
- warbixinta macallinka madaxa ahi uu ka sameeyay shirka dib-u-fiirinta sannadlaha ah ee loo soo gudbiyay LEA
- dib-u-fiirinta ay LEA ku sameysay cadeynta.

